

Tallaalka ka hor iyo kadib

Tallaalka ka hor, kalkaalisada caafimaadka bulshada ayaa weydiinayo haddii canuga caafimaadanyahay iyo haddii ay jirtay wax falcelino ah tallaalada hore kadib. Inta badan carruurta waxay muujiyaan falcelino yar ama falcelin la'aan oo tallaalada.

Tallaalada ka hor

Tallaalka ka hor, kalkaalisada caafimaadka bulshada ayaa weydiinayo haddii canuga caafimaadanyahay iyo haddii ay la kulmeen falcelinada tallaalada hore. Xasuuso inaad soo ogeysiisid kalkaalisada haddii canuga qabo xasaasi ama dhibaatooyinka kale ee caafimaad, ama haddii canuga uu hadeer helay daawo ama tallaalka ka baxsan barnaamijka.

Intaas waxaa dheer, kalkaalisada waa in la soo ogeysiiyaa haddii hooyada ay heshay daawooyinka saameeyay nidaamka difaaca inta lagu jiro uurka ama naasnuujinta sababtoo ah muhiim ayay u noqon kartaa in lala daahiyo tallaalka tallaalada qaarkood.

Tallaalida canug qaba qabow ama haddii kale waxyar cimilada aysan halis ku aheyn. Si kastaba, waa caadi in dib loo dhigo tallaalka dhacdada jirada raagta oo ay la jirto qandhada ka sareyso 38 °C.

Carruurta la kulmay falcelino aan caadi aheyn kadib tallaalada hore iyo carruurta qaba jirooyinka halista ah oo muddada dheer waa inuu qiimeeyaa dhaqtar tallaalida ka hor. Xaaladaha qaarkood, muhiim ayay u noqon kartaa in laga weecin barnaamijka.

Tallaalida kadib

Inta badan carruurta waxay leeyihiin falcelin yar ama ma lahan falcelin tallaalka kadib. Qandhada ka sareyso 39 °C iyo/ama yareysay xaalada guud waxay aastaan u noqon kartaa cudur halis ah oo si muhiim ah uma ahan falcelinta tallaalka. Sidaas darteeda, marwalba la xiriir dhaqtar haddii aad ka walaacsantahay canuga.

Falcelinada tallaalada (saameynada caafimaadka)

- Gaduudashada, bararka iyo xanuunka aaga durida waxay dhacdaa waqti ku waqti kadib markii dhammaan tallaalada la tallaalo oo waxay socon kartaa dhoor maalmood.
- Qandhada dhexaadka, nasiinyo la'aanta, oohinta, hurdo la'aanta, dareemida jiro ama cunis la'aan ayaa dhacdo illaa hal oo toban canug gudahood tallaalka kadib. Qandhada ka weyn 39 °C caadi kama ahan.
- Carruurta yar, qandhada degdega ku kordheyso waxay u hogaamin kartaa jiricada qandhada. Jiricada qandhada halis ma ahan laakin waa in lala xiriiraa dhaqtar go'aamiyo cudurka kale ee daran.
- Cadaanka, dareemida jirada ama suuxdinta tallaalka kadib aad ayay caadi ugu tahay carruurta weyn in ka badan ilmaha iyo ku dhawaad marwalba sabab la xiriirto canuga ka falcelinayo cirkada iyo/ama riinjiga ama xaalada.
- Falcelinta xasaasiyada ee tallaalada waxay dhici karaan xaalado marmar ah. Falcelinada xasaasiyada ugu halisan waxay durbadiiba imaadaan tallaalka kadib. Sidaas darteeda, canuga waa inuu ku sugaa xarunta caafimaadka bulshada oo ugu yaraan labaatn daqiiqo tallaalka kadib.

Diiwaanka Tallaalada Noorweyaanka SYSVAK

Ujeedada SYSVAK waa joogteynta dulmarka heerka tallaalka oo shaqsiga iyo si loo joogteeyo caymiska tallaalka ee ku saleysan wadanka oo dhan. Wixii adeega caafimaadka bulshada, diiwaanka sidoo kale waa qalab lagu hubinayo in carruurta oo dhan la siiyo tallaalo kala duwan.

Dhammaan tallaalada nala siiyay waa in lagu qoraa SYSVAK. Ma jiraan fursad lagu diidayo diiwaangelinta tallaalada lagu bixiyay Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada. Tallaalada aan diiwaangashaneyn ee la siiyay horaantii waxaa lagu diiwaangelinayaa tixgelinta waqtiga la soo dhaafay.

Magaca, lambarka aqoonsiga shaqsiga Noorweyaanka, taariiqda tallaalada la siiyay iyo tallaalida waxaa lagu diiwaangeliyaa SYSVAK. Warbixinta waxaa lagu keydiyaa sida waafaqsan sharciyada quseeyo arimaha gaarka ee shaqsiga ee adeega caafimaadka.